

Mabaa’diida iyo Hadafka Guddiga Caalamiga ah ee Horumarinta Dadka (CISP) waxaa soo koobaya Baaqa Waxa ay ku talojirto iyo Xeer-Anshaxeedka Barnaamijyada Iskaashiga, ee la ansaxiyey 1997.

**Baaqa waxa ay ku talojirto** waxa uu si kooban u sharxayaa mabaa’diida dhiirrigelinaya waxqabadka CISP:

- - Xuquuqaha aasaasiga ah (haqab-beelka cuntada, la-dagaallanka saboolnimada iyo fageynta dadka, si habboon u isticmaalidda kheyraadka dabiiciga ah);
- - Xuquuqaha kale ee aasasiga ah ee shakhsiyaadka iyo bulshooyinka degaanka (waxbarshada, tababar-xirfadeed, daryeel caafimaad iyo deegaan caafimaad leh);
- - Geeddi-socodyada nabad-dhalinta iyo yareynta dhibaatooyinka xaaladaha degdegga ah ee adag.



**Xeer-Anshaxeedku** waxaa uu bixinayaa dhabba-tusayaasha istiraatiijiga ah ee CISP ee hagaya mashaariicdeeda bani’aadamnimada, dib-u-dhiska iyo horumarinta. Xeer-Anshaxeedku waxaa loola jeeday in uu gacan ka geysto hawsha shaqaalaha CISP ee dejinta, hirgelinta iyo kogjoogteynta mashaariicda CISP.

Eeg [Baaqa waxa ay ku talojirto iyo Xeer-Anshaxeedkeeda](#) .

Baaqa waxa ay ku talojirto waxaa wax laga beddeley sanadkii 2008dii iyada oo ay wax ku biiriyeen xafiisyada dalalka ee CISP iyo xafiiska weyn ee Roma. Baaqa cusub waxaa ka muuqata aaminaadda la aaminsan yahay in helidda alaabada iyo adeegyada aasaasiga ah, cuntada, kheyraadka, iyo nolol sharaf ku dhisan ay yihiin xuquuqo aan la duudsiin karin oo qof

kasta uu leeyahay.

Eeg ["Xuquuqaha iyo la-dagaallanka saboolnimada. Hababka iyo hawlgallada mudnaanta u leh CISP – Horumarinta Dadka"](#) .

## **Nidaamkeenna korjoogteynta**

CISP waxa dadaal mug leh ay ku bixisaa korjoogteynta iyo qiimeynta siyaasadaheeda, barnaamijyadeeda iyo mashaariicdeeda. Dadaalka muddada fog ah ee ay CISP ku bixineyso arrintan waxaa daliil u ah dhisiddii 1990 la dhisey "Forum Valutazione", oo ah gole qiimeyneed oo dardargeliyey doodda iyo dib-u-eegista caalamiga ah ee korjoogteynta iyo qiimeynta. Arrintan waxaa ay sidoo kale ka muuqataa

[Xeer-Anshaxeedka CISP](#)

, halkaas oo lagu aqoonsadey in "si loo hubiyo taabogalnimada mashaariicda la hirgeliyo, waa in dareen loo lahaadaa soocistooda/aqoonsashadooda, qorsheyntooda, korjoogteyntooda iyo qiimeyntooda".

Korjoogteyn lagu sameeyo Soomaaliya waxaa ay leedahay culeysyo u gaar ah taas oo ay sabab u tahay sida kooban ee loo gaari karo goobaha mashaariicda laga fulinayo taas oo ay sababtey nabadgelyo-xumada iyo xaaladda bulsho iyo tan siyaasadeed ee aadka isu-bedbeddelaysa. Iyada oo arrintan maanka lagu hayo, ayaa CISP waxaa ay ku dadaaleysaa in ay xaaladda waafajiso ayna ballaarisoo baaxadda qalabkii caadi ahaan korjoogteynta lagu sameyn jirey si ay u wanaajiso taabogalnimadooda.

Nidaamka korjoogteynta ee CISP waxaa xuddun u ah laba tiir oo waaweyn:



1. **Qalabka Caadiga ah ee Maareynta Meertada Mashaariicda**, oo leh daraaseyn joogto ah oo lagu sameeyo waaxaha iyo adeegyada, in shaqaalaha Soomaalida ah la siiyo kaalin dheeraad ah oo korjoogteyn iyo iskaashi lala yeesho NGO-yada degaanka. Dadaalka CISP waxaa ka mid ah booqashooyin korjoogteyn oo badan oo joogtana ah, tababar joogto ah oo loo sameeyo shaqaalaha gudaha ka shaqeeya, qalabka GPS oo khariidad loogu sameeyo hawlgallada;

2. **Hababka korjoogteynta ee bulshada ku dhisan**, iyada oo ka faa'iideysaneysa muddadii dheereyd ee ay joogtey Soomaaliya, fahamka wanaagsan ee ay u leedahay xaaladda, xiriirka wanaagsan ee kala dhexeeya bulshooyinka, iyo iyada oo si joogto ah ula falgasha/shaqeysa qaybaha bulshada, ayaa CISP waxa uu hadafkeedu yahay in ay ka-faa'iideystayaasheeda ay ku tababarto geeddi-socodka korjoogteynta, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo saameynta ay reebayaan hawlaha, hufnaanta geeddi-socodyadeeda iyo habboonaanta hawsheeda. Bulshooyinka degaanka, oo ay wakiil ka yihiin guddiyo iyo golayaal, ayaa kaalin muhiim ah ku leh korjoogteynta hawlaha iyo adeegyada ay bixiso CISP. Kooxaha bulshada ee CISP ka taageeraya dadaalkeeda korjoogteynta waxaa tusaale u ah: Guddiyada Waxbarashada Bulshada, Golayaasha Waxbarashada Degmada, Guddiyada Biyaha iyo Golayaasha Caafimaadka.

Qaybta [Wararka Hawsha](#) ee shabakaddan *internet*-ka waxaa ay qayb ka tahay dadaalka ay CISP ku wanaajineyso korjoogteynteeda joogtada ah ee waxqabadyada mashaariicdeeda iyo in lagu soo ururiyo xog, jawaab-celin iyo daliil la arki karo oo muujinaya habboonaanta, huftaanta iyo saameynta hawsha CISP ay ku reebtey goob kasta oo mashruuc laga fuliyo.

## Nidaamka maareynta iyo buugga shaqaalaha ee CISP

[Nidaamka Maareynta](#) waxaa uu muujinayaa sida mabaa'diida daahfurnaanta iyo xisaabtanka loogu adeegsado maamulka iyo hawlgallada maalinlaha ah ee ururka.

Buugga Shaqaalaha CISP waqtigan dib-u-eegis ayaa lagu sameynayaa waxaana sida ugu dhaqsamaha badan ee suuragalka ah loo soo gelin doonaa qaybtan.